

TriMet Waxay Dhoortaa Xuquuqda Madaniga

TriMet waxay ka shaqeysaa barnaamijyadeeda iyada oo aan firinin isirka, midabka, asal qaran, diin, kacsii, kacsiga qofka doorto, xaaladda guurka, da'da ama itaal darri sida waafaqsan sharciyada lagu dabaqai karo.

Oraahda Siyaasadda Qeybta VI ee TriMet

Qeybta VI Sharciga Xuquuqda Madaniga (Civil Rights Act) ee 1964 wuxuu leeyahay:

"In aan la adeegsan karin isir, midab ama asal qaran si qof ku sugan Mareykanka looga reebo in uu ka qeybgalo ama loo diido manaafacaad, ama loo geysto takoor xagga barnaamij kasta ama hawl qaadata kaalmada maaliyadda federaalka."

TriMet waxaa dhab ka ah in ay u hoggaansanto sharuudaha Qeybta VI dhamaan barnaamijyadeeda iyo hawlahada maal gelinta ka hesho federaalka. Si aad u codsatid macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sharuudaha takoor la'aanta Qeybta VI ee TriMet, naga soo wac 503-238-7433 (TTY 7-1-1) ama email u soo dir hello@trimet.org

Soo Jeedinta Ashtakada Qeybta VI

Qof kasta oo aaminsan in isaga ama iyada loo geystay xumaanta dhaqanka takoorka sharci darrada ah ee hoos yimaada Qeybta VI wuxuu ashtako gaarsiin karaa TriMet. Ashtako kasta oo noocaas ah waa in la soo qoro loona gudbiyo TriMet muddo 180 maalin gudahooda laga bilaabo taariikhda lala kulmay takoorka la soo sheegay. Si aad u heshid macluumaad ku saabsan sida loo gudbiyo ashtakada, la xariir TriMet adiga oo adeegsanaaya mid ka mid ah saddaxda siyaabo hoos ku qoran.

TriMet
Director, Diversity and Transit Equity
1800 SW 1st Avenue, Suite 300
Portland, OR 97201

Telefoon: 503-962-2217

Faks: 503-962-6469

Email: hello@trimet.org

Waxaad si toos ah cabasho ugu gudbin kartaa Maamulka Gaadiidka Federaalka ee Xafiiska Xuquuqda Dadweynaha, Attention: Title VI Program Coordinator, East Building, 5th Floor-TCR, 1200 New Jersey Ave., SE, Washington, D.C.20590.

Habraaca Cabashooyinka Xaquuqda Bulsho

Qof kastoo oo rumaysan in TriMet kula kacday fal cunsurinimo sharci darro ah oo ku salaysan isir, midab, waddankuu ka soo jeedo, diintiisa, jinsigaaga, nooca galmo ee uu aaminsan yahay, heerkiisa guurka ama da'da wuxu soo xeraysan karaa dacwad cabasho bulsheed soona gudbin karaa foomka Cabashooyinka Xuquuqda Bulshada TriMet.

TriMet waxay baartaa dacwooyinka la soo gudbiyay wixii aan ka horeyn 180 maalmood marka dhacdada la leeyahay way dhacday. TriMet waxay ka shaqaysaa cabashooyinka dhammaystiran. Marka dacwad dhammays ah la helo, TriMet dib u eegis bay ku samaynaysaa si ay go'aamiso bal in TriMet sharci u haysato.

Dacwadu waxay heli doontaa warqad aqbaliseed oo qofka ogaysiinaysa bal in dacwadiisii/dacwadeedii ay baari doonto TriMet.

TriMet waxay guud ahaan ku dhammaystirtaa dacwadaha muddo 90 maalmood gudahood ah oo ka bilaabmaysa maalinta foomka cabashada la dhammaystiro. Haddii macluumaad dheeraada loo baahan yahay si kiiska loo xalliyo, TriMet waxay la soo xiriiri kartaa cabtaha. Illaa iyo waqti intan ka dheer ay caddayso TriMet maahane, cabtuhu wuxu haystaa muddo toban (10) beri oo ka bilaabmaysa maalinta uu warqadda helo si uu macluumaadka ugu diro baaraha TriMet ee kiiska loo xilsaaray.

Hadii baaraha TriMet aanu cabtuhu la soo xiriirin ama aanu helin macluumaadka dheeraadka ah muddadaas shuruuda ah gudaheeda, waxa laga yaabaa in TriMet kiiska xirto. Kiiska waxa sidoo kale la xiri karaa hadii cabtuhu uu ka tanaasulo sii wadista kiiska.

Marka baaristu dhammaato, TriMet waxay cabtaha u soo diraysa warqad soo koobaysa natiijada baaritaanka, sheegaysa waxyaalaha la ogaaday, kuna talinaysa tallaabo kasta oo sixitaaneed oo la qaadayo natiijada baarista darteed. Haddii cabtuhu ku gacan sayro TriMet go'aankeeda, cabtuhu wuxu dalban karaa dib u eegis isagoo codsi qoraala u diraya Maamulaha Guud ee TriMet muddo todoba (7) beri gudahooda ka dib marka uu helo warqadda TriMet, isagoo caddaynaya sababaha dib u eegista loo cuskanayo. Maamulaha Guud wuxu cabtaha ku ogaysiinayaa go'aankiisa uu ku aqbalayo ama ku diidayo codsiga muddo 10 beri gudahood ah. Kiisaska dib u eegista laga ogolaado, Maamulaha Guud waa inuu warqad go'aan u soo diraa cabtaha marka uu dhameeyo dib u eegista.

Gaadiidka Magaalada Dagmada Tri-County Xaafadda Oregon (TriMet)

1800 SW 1st Ave., Suite 300
Portland, OR 97201

503.962.2213
trimet.org

FOOMKA ASHTAKADA QEYBTA VI*

Qeybta VI Sharciga Xuquuqda Madaniga 1964 (1964 Civil Right Act) wuxuu raba "In aan la adeegsan karin isir, midab, ama asal qaran si qof ku sugan Mareynkanka looga reebo in uu ka qeybgalo ama loo diido manaafacaad, ama loo geysto takoor xagga barnaamij kasta ama hawl qaadata kaalmada maaliyadda federaalka."

Macluumaadka soo socda waa lagama maarmaan, waxayna nagu kaalmeyaan hawsha laga qabto ashtakadaada. Haddii aad u baahatid kaalmo si aad u buuxisid foomkaan ama haddii aad u baahatid in macluumaadka laguugu siiyo qaabab kale, fadlan na ogeysii.

Soo buuxi foomka kaddibna ku soo celi TriMet, Director of Diversity and Transit Equity, 1800 SW 1st Ave., Suite 300, Portland, OR 97201.

1. Magaca Ashtakoodaha: _____
2. Cinwaanka: _____
3. Magaalada: _____ Gobolka: _____ Zip Code: _____
4. Nambarka Telefoonka (guriga): _____ (shaqada): _____
Email: _____
5. Naftaada miyaad u buuxisay ashtakadaan? _____. Haddii aysan sidaas ahayn, qor magaca iyo xariirka aad la leedahay qofka aad ka ashtakoneysid:
_____.

Fadlan sharax sababta aad ugu buuxisay dhinaca saddaxaad:

Fadlan xaqiiji in aad heshay ruqsadda dhinaca loo geysta xumaanta haddii aad u buuxineysid dhinac saddaxaad. _____

6. Kuwa soo socda, teebaa sida ugu wanaagsan u sharaxda sababta aad u aaminsan tahay in takoor uu dhacay? Sababta ma waxaa (calamee sanduuq kasta oo lagu dabaqi karo):
 - a. Isirka:
 - b. Midabka:
 - c. Asal Qaran:

7. Maalintee lala kulmay takoorka la soo sheegay? _____

8. Adiga oo adeegsada erayadaada, sharax takoorka la soo sheegay. Sharax maxaa dhacay iyo maxay tahay siyaasadda, barnaamijka, hawsha ama qofka aad aaminsan tahay in uu ka dambeyay takoorka.

9. Ma waxaad ashtakadaan u gudbisay wakaalad ka tirsan federaalka, gobolka, ama deegaanka, ama maxkamadda federaalka ama maxkamadda gobolka?

Haa: Maya:

Haddii ay haa tahay, calaamee sanduuq kasta oo lagu dabaqi karo:

Wakaaladda Federaalka

Maxkamadda Federaalka

Wakaaladda Gobolka

Maxkamadda Gobolka

Wakaaladda Deegaanka

10. Fadlan keen macluumaad ku saabsan qofka lala xariiro ee ku sugan wakaaladda/maxkamadda meesha ashtakada loo gudbiyay.

Magaca: _____

Cinwaanka: _____

Magaalada: _____ Gobolka: _____ Zip Code: _____

Namabarka Telefoonka: _____

11. Fadlan saxiix hoos. Waxaad ku lifaaqi kartaa qaoraal ama macluumaad kale aad adiga u maleysid in ay munaasab u yahiin ashtakada.

Saxiixa Ashtakoodaha

Taariikhda